## Shanta Qodob ee loogu talagalay Boston ee Nooca Delta

1. Tallaalka loo siman yahay iyo helida taageeraha.
2. Tallaalka iyo/ama amarka baadhitaanka ee shaqaalaha magaalada
3. Maalgelinta cusub ee HVAC oo lagu sameeyo dugsiyada
4. Amarka maaskaraha la dul dhigay dugsiyada iyo dhismayaasha magaalada.
5. Amarka cusub ee maaskarada la dul dhigay dhammaan gudaha goobaha dad waynaha.

## Ku saabsan Qorshaha Shanta Qodob ee Nooca cudurka Delta

Qorshaha shanta qodob ee Boston ee nooca Delta waxay ka hortagtaa xaga xudunta jawaabtayada COVID-19, ay ku jiraan amarka maaskaraha ee gudaha goobaha dadwaynaha ee bilaabmaysa 8:00 a.m. Ogosto 27, 2021. Qof kasta oo degen Boston way ka qaybqaadan karaab si ay magaalada uga dhigaan mid amaan ah. Is talaal, xidho maaskarahaaga, dhaq gacmahaaga oo is baadh, gaar ahaan haddii aad safartay, ama aad qabtid astaamo, ama aad la kulantay qof qaba fayraska.

1. Inuu qof kasta helo tallaal loo wada siman yahay- Waanu ognahay in tallaalada ay yihiin qaabka ugu wanaagsan ee nafaheena aan u ilaalino iyo kuwan inagu xeeran. Boston waxay noqotay mid ka mid ah magaalooyinka waa wayn ee ugu tallaalka badan gudaha wadanka. In ka badan 68% dadka degen ayaa qaatay ugu yaraan hal muditaan. Labbadii todobaad ee u dambeeyay oo keliya, ugu badnaan 8.000 oo dadka degen ah ayaa qaatay muditaankooda koowaad. Marka tallaalku aad waxtar u leeyahay oo uu yahay hubkeena ugu xooga badana la dagaalanka safmarkan, magaaladeenu waxay hoy u tahay in ka badan 100,000 oo carruur ah, badankana weli uma qalmaan tallaalka.
2. Amarka tallaalka ee shaqaalaha magaalada - Dhammaadka Ogosto, dhammaan shaqaalaha magaalada, qandaraaslayaasha iyo dadka mutadawiciinta ah waxaa looga baahan doonaa inay ku xaqiijiyaan heerkooda tallaalka ama baadhida dhexda madashada dhigitaalka ah ee la maareeyo ee ilaaliya shaqaalaheena iyo dadwaynaha.
3. Maalgelinta cusub ee HVAC ee dugsiyada - Waxaanu xusnay dib u furida dugsiyadeena gudaha gu'gii oo waxaanu diyaarinaynaa sanad dugsiyeed badbaado leh oo kale oo ah waxbarashadda qof ahaaneed. Iyaddoo ay weheliso shaqada lagu ballan qaaday ee macalimiinta dugsigeena, ilaaliyayaasha, darawalada basaska, iyo maamulayaasha waa inay sii wataan inay maalgeliyaan dhismayaasha dugsiga ah ee caafimaadka leh. Waxaanu ku ballan qaadaynaa $30 milyan si loo horumariyo kulayliska, hawaynta, iyo hawada wanaajinta gudaha dhismayaashayada dugsiga sanad dugsiyeedka soo socda..

4. Amarka maaskaraha la dul dhigay dugsiyada iyo dhismayaasha magaalada.-- Amarka maaskaraha gudaha guriga hadda ka hor waxa uu diyaar u yahay dhismayaashada degmadda, ay ku jiraan Hoolka Magaalada iyo dugsiyadeena dad waynaha.
5. Amarka cusub ee maaskarada la dul dhigaya dhammaan gudaha goobaha dadwaynaha.- waa inay samaynaa dhammaan waxa aan karno si aanu u ilaalino dadka degen lehna da' kasta iyaddoo wadata tallaabooyin xoogan oo ka hortagga ah. Waxaan ognahay in maaskarahu aad u habboon yahay marka qof kastaa uu xidho. Taasi waa sababta ay Boston u dhaqan galinayso amarka maaskarada lagu xirto goobaha gudaha ah ee dadwaynaha. Amarka maaskaraha ee goobaha gudaha ee dadwaynaha ee Boston waxa uu xadidi doonaa nooca fayraska Dellta. Tani waxay lama huraan u tahay xoojinta kalsoonida dadwaynaha iyo caawimada si loo xaqiijiyo ganacsigeena iyo goobaha inay sii wadi karaan hawlgalada buuxda. Maaskarahu waxa uu ilaaliyaa kuwan xidha iyo kuwan ku xeeran iyaga, ay ku jiraan dadka aadka ugu nugul nooca fayriska Delta -dadka waa wayn ee difaacooda jidhku liito iyo carruurta aan weli u qalmid inay tallaal qaataan. Amarkan caafimaadka dadwaynaha waxuu dhaqan galayaa Jimcaha, Ogosto 27, 2021.